



Sii Wadista Barnaamijka Waxbarashada Soogaleytiga ee lagu caawinayey ardayda iyo qoysaska Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS)

Iyada oo waqtigii xaggaagu ahaa mid wax ku ool ah, Barnaamijka Waxbarashada ee Soogaleytiga wuxuu ahaa mid sii socday si uu u gargaaro ardayda ay waalidiintoodu yihiin qoysaska soo galeytiga ah sidii ay wax uga ogaan lahaayeen caqabaha iskuulka ay kala kulmaan.

Dayrtani, Barnaamijka MEP wuxuu qabanaaya kulan-shaqo oo ardayda loogu diyaaraniyo shirarka soo socda ee waalidka-ardayda. Waalidiinta oo hagaya himilada caruurtooda, barnaamijka wuxuu ardayda ka caawinayaa aqoonsiga, dhiirgalinta iyo hayaanka jidka ay ku qalin jabinayaa, iyadoo xooga la saarayo dhammaan gobolka in la horumariyo kor loo qaado tirada iskuulada ka qalin jabineysa.

“Inta ay ardaydu ardayda kale ee filkooda ah la isbaranayaan, waalidiintuna waxa ay baranayaan arrimo ku saabsan sidii ay caruurtooda Jaamacadaha iyo shaqada diyaar ugu noqon lahaayeen iyo waliba hoggaaminta waalidka,” sidaas waxaa tiri Elena Collazo-Santiago, oo ah macallin si gaar ah loogu xil saaray barnaamijka.

Barnaamijka MEP wuxuu caawiyaa qiyaas ku dhow 200 oo arday waxna ka barta Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS). Barnaamijka wuxuu qeyb ka yahay oo la abuuray sanadkii 1968 ee Waaxda Waxbarashada Title I, barnaamijka qeybta C, kaasi oo abuuray in la caawiyo caruurta da’doodu u dhaxeeyso 3-21 sano oo waalidiintoodu ama dadka daryeela ka shaqeeyaan beeraha, kalluumaysiga ama dhirta iyo daaqa.

Barnaamijka wuxuu leeyahay qeyb la qabto xilliga xaggaaga ah. Waqtiga xaggaaga ka qeybgalayaashu waxa ay ka shaqeeyaan akhriska, qoraalka , iyo xisaabta, iyaga oo booqda xarunta OMSI; waxa kale ay ka qeybqaataan xaflada dhaqan oo lagu samaayo casuumada tamale. Arday tiradoodu dhan tahay 150 ayaa midkiiba waxa la siiyaa hal joog oo kabo ah iyo kaadh ay ku jiro \$50 doolar oo hadyad Old Navy oo ay ku deeqday [My New Red Shoes](#), oo ah hay’ad macaash doon ahayn oo caawisa dadka aan haysan guryaha iyo caruurta dhaqaalahoodu hooseeyo.

Barnaamijka MEP wuxuu raadinayaa inuu aqoonsado arday fara badan oo xaq u yeesha kana faa’iido barnaamijka. Qof kasta oo ka warhaya cid u qalanta barnaamijkan waa in ay la xiriirtaa Collazo-Santiago (971-347-5923, ecollazosantiag@pps.net) ama Juan Ramirez oo ah qorayaa barnaamijka MEP (503-735-5697, jramirez@pps.net).